



# Soomaali/Somali

**Xasuusashada Grenfell: Tallooyinka iyo tallaabooyinka xigga goobta xasuusta (Nofeembar 2023)**

*Waxaan soo saarnay noocaan warbixinta gaaban ee ay tahay in loo turjumo luuqado kaladuwan. Waxaad warbixinta oo buuxda ka akhrin kartaa (oo la turjumay) webseedkeena:*
**www.grenfelltowermemorial.co.uk/report2023**

**Xogta kooban ee warbixinta**

Kadib dhacdadii naxdinta lahayd ee dhacday 14 ka Juun 2017, Guddiga goobta Xasuusta ee Grenfell Tower ayaa la abuuray. Ujeedadeenu waxay ahayd inaan awooda saarno aragti dhab ah oo ay bulshadu hogaaminayso oo ku habboon xuska, si loo xasuusto dadkii naftooda waayay iyo dadkii nolashooda isku badeshay sida abadiyan ah habbeenkaas foosha xumaa. Waxaan billownay hawshaan Sebteembar 2019.

Illaa markaas, waxaan si dhow ula shaqeynay bulshada Grenfell, oo aan ula jeedno qoysaska dhintay, dadka badbaaday, dadka degan Lancaster West Estate iyo bulshada qoysaska qareenada dhaw la ah ee ku nool meelo u dhaw Grenfell Tower. Waxaan ka shaqeynay inaan fahano rajooyinkooda iyo rabitaanada la xariira goobta xasuusta mustaqbalka. Warbixinteenii Maayo 2022, Xasuusashada Grenfell: safarkeena ilaa hadda, waxaan soo bandhignay waxa aan ka maqalnay bulshada Grenfell illaa hadda. Sidoo kale tani waxay nasiisay fursad aan ku tijaabino fahanka waxyaabaha aan maqalnay.

Warbixintaan waxay ka hadlaysaa waxyaabo kale oo dheeraad ah. Waa gabgabada ku dhawaad afar sano oo shaqo ah waxayna dejisay yoolka goobta xasuusta ee bulshada Grenfell, maamulkeeda mustaqbalka iyo nidaamyada socda ee la xariira xasuusashada waxyaabaha bulshadeenu dhumisay. Waxaan bulshadeena la wadaagnaa waxyaabaha ay ka dhaheen qaabka goobta xasuusta ay tahay inay noqoto. Meelaha ay tahay inay ka jiraan aasaas la xariira waxyaabaha dadka rabaan, waa oggolaanaa. Meelaha ay ka jiraan kaladuwanaanshaha badan ee la xariira ragtida, ama meelaha dadka rajadooda aan sida fiican loo qeexin ama qeexitaan yar lagu sameeyay, waan oggolaanaa.

Ka guddi ahaan waxaan sameynaa afar ballanqaad:

■ Ballanteena koowaad waa inaan abuurno goob leh xushmad iyo ammaan. Meel waarta oo dadka dadkoodii ka dhinteen ay ku dareemi karaan qadarin iyo inay u dhaw yihiin kadib marka ay xasuustaan, iyo meel bulshadeenu ku xasuusan karto.

■ Ballanteena labaad waa inaan abuurno goob xasuus oo adag oo gacan ka geysan doonta in masiibadii Grenfell Tower aan la ilaawin. Ma ahan hadda, ma ahan sanadaha soo socda. Anaga, iyo bulshada kale ee Grenfell Tower, dhammanteen arrintaan waa noo cadahay.

■ Ballanteena saddexaad waa inaan gacan ka geysano dejinta qabanqaabada si loo damaanad qaado ilaalinta goobta xasuusta iyo inaan la oggolaan inaysan meesha ka bixin ama la ilaalin.

■ Ballanteena afaraad waa inaan dhowrno codadka iyo rabitaanada bulshada Grenfell inay qayb muhiim ah ka noqdaan go'aan gaarista ku saabsan goobta xasuusta.

Intaan kujirto safarkeena, waxaan ku dhaqaaqnay xawliga bulshadeenu u baahneyd. Bulshada Grenfell waa bulsho gaar ah marka laga eego meelo badan, waxaana kaliya saxan in xuskeena loo go'aamiyo qaab gaar noo ah.

Intaan usii dhawaanayno marxalada naqshadeynta iyo dhisida goobta xasuusta, warbixintaan waxay dejinaysaa marxaladaha labaad ee abuuristeeda. Taasi waxaa kujira qalanqeynta ciladaha dhalan kara sida lahaanshaha mulkiyada, iyo soojeedinada la xariira arrimaha Grenfell Tower loo ilaalin lahaa loona dhowri lahaa mustaqbalka, iyadoo la raacaayo rabitaanka kuwa dadka ugu badan waayay.

**Waxaan xasuusinaynaa dawlada inay ka dhabeyso dadaalkeeda goobta xasuusta, iyo inay kasoo baxdo waajibaadkeena ka dhabeynta soojeedinada guddiga.**

**Waqtiga saxda ah, jawaabaha dadwayna ee dawlada iyo heshiis ku saabsan la shaqeynta guddiga si horey loogu sii socdo waa muhiim, waana in la waafajiyo waqtiga lagu sheegay warbixintaan.**

Marka laga imaado – Bulshada – dadaalka shaqsi ee gaarka ah, khabiiradeena gudaha waxay gacan ka geysteen uruurinta aragtiyada iyo fikradaha la xariira 'nooca' iyo 'dareenka' goobta xasuusta ee bulshada Grenfell.

Arrintaan waxay gacan ka geysatay, wada sheekeysigeena tooska ah iyo kan qodobada dheer ee aan la yeelano bulshada Grenfell, iyo wada sheekeysiga bulshada ee ay qabtaan dadka maamulka nala haya, inay ka warbixiyaan tallooyinkeena. Ka guddi ahaan, waxaan sidoo kale tallo ka qaadanay qoysaska, kooxaha iyo masuuliyiinta qaybta ka ah xasuusta masiibada, labadaba Boqortooyada Ingiriiska iyo guud ahaan aduunka oo dhan. Tallooyinkeenu waxay isku keeneen dhammaan cilmi baaristaan si ay u meel mariyaan ballanqaadkeena ku aadan ixtiraamida xasuusta dadka naga dhintay.

Warbixintaan waa yool muhiim ah oo la gaaray kuna aadan in aragtida xuska bulshada laga dhigo mid dhab ah. Kadib marka la daabaco warbixintaan, waxaan soo saari doonaa baaritaankeena ku aadan khabiir iyo koox bulsho oo qaabilsan naqshadeyn. Waxaan filaynaa inaan arrintaan sameyno gu'a xigga, iyo in kooxda la doorto dhammaadka sanadka 2024. Waxaan filaynaa in la sameyn doono naqshada xasuusta ayadoo gacan laga helaayo bulshada dabayaaqada sanadka 2025, iyo in dhisitaanka goobta xasuusta bilaabato dabaqaayada sanadka 2026. Sidaan gadaal oga sheegnay warbixintaan, waqtigaan saxda ah wuxuu sidoo kale ku xirnaan doonaa arrimo aan gacanteena ku jirin, sida go'aanka dawlada ee ku saabsan mustaqbalka Grenfell Tower.

<u>**Guudmarka guud: tallooyinkeena ku saabsan goobta xasuusta Grenfell Tower**</u>

Anagoo ku saleynayna waxyaabaha aan ka maqalnay bulshada Grenfell waxaan ku tallinaynaa waxyaabahaan soo socda ee la xariira naqshada goobta xasuusta.

1. Qoysaska ku dhintay masiibada, dadka habbeenkii badbaaday oo waayay guryahoodii, iyo dadka kunool meelaha u dhaw Grenfell Tower, waa inay mar walba udub dhexaad u noqdaan go'aanada ku saabsan goobta xasuusta.

2. Goobta xasuusta waa inay noqoto meel qarsoon oo la qaabeeyay lagana dhigay meel waarta, oo aan ula jeedno waa inay noqoto meel abadiyan jirta.

3. Goobta xasuusta waa inay tahay goob ammaan ah oo lagu sameeyo xasuus iyo dib u milicsiga, labadab shaqsi ahaan iyo bulsho ahaanba, dadka iyo waxa aan waynay.

4. Goobta xasuusta waa inay leedahay beer; aagg cagaar ah oo waxyaabaha laga beeray ka turjumayaan dareen kobac iyo cusbooneysiin si ay gacan oga geysato xasuusta.

5. Goobta xasuusta waa inay ka kooban tahay aag gaar ah oo lagu muujiyo murugada iyo tacasida qoysaska ay ka dhinteen dadka ay jeclaayeen.

6. Qaabeynta goobta xasuusta waa inay ka turjumayso caqiidooyinka iyo kaladuwanaanshaha dhaqamada badan oo taabanaya guud ahaan bulshada Grenfell, iyo kuwa dadka naga dhintay iyo kuwa ka badbaaday masiibada.

7. Qaabeynta xuska waa inay hubisaa in aduunku uusan ilaawin waxa ku dhacay dadka naga midka ahaa iyo bulshadeena. Qaabeynta goobta xasuusta waa inay kujiraan dookhyo lagu daraayo magacyada dadka naga dhintay (haddii qoysasku rabaan sidaan), waana in la tixgeliyo dheerarka iyo aragtida ku habboon xuska.

8. Goobta xasuustu waa inay sii jirto jiil ka jiiln waana inaan la dayicin. Diyaarinta ku habboon waa in la sameeyo si xasuusta loogu sameeyo daryeel loona maareeyo mustaqbalka waana in maalgelin loo sameeyo loogu talagalay si arrintaan u dhacdo.

9. Farshaxanku wuxuu qayb muhiim ah ka ahaa yoolka bulshada Grenfell ee ku aadan dhuminta rajada. Foobta xasuustu waa inay leedahay xasuus (iyo sidoo kale dhismo la dhiso ama dhisme kale oo booqdayaasha ka ilaalinaya cimilada) iyo/ama farshaxan shaqo oo ka turjumaya bulshada, jecelka, rajada, murugada iyo dadka naga dhintay.

10. Biyaha iyo isticmaalka layrku waxaa qayb muhiim ah oo ay sheegeen bulshada Grenfell. Kuwaan waa in lagu tixgeliyo nidaamyada lagu abuuraayo goobta xasuusta.

11. Goobta xasuustu waa inay taageero baahiyaha qoysaska caruurta goobta la imaanaya. Sidoo kale Guddigu wuxuu ku tallinayaa in goobta xasuustu hesho qaab dib loogu milicsanaayo caruurta aan ku waynay masiibada, iyo sida carruurteena iyo dadkeena yaryar u muujiyeen samirka badan.

12. Marka la dhiso goobta xasuusta, magaca sharciga iyo maamulka goobta xasuusta ee maalinlaha ah waa in loo dhiibo hay'ad khibrad leh oo ku habboon oo ku shaqeysa heshiiska labadaba dawlada dhexe iyo tan deegaanka. Royal Parks waa tusaalaha ururka aan aamisanahay inay ku habboon yihiin, sababo la xariira khibrada ay u leeyihiin maareynta meel badan oo xasuus oo dalka micno wayn ugu fadhiya. Guddigu wuxuu ku tallinayaa inay tixgeliyaan suurtagalnimada in loo dhiibo Royal Parks, ama ururo lamid ah, si ay gacan oga geystaan maamulka iyo dayactirka socda ee goobta xasuusta kadib marka la dhiso.

**<u>Talladeena dhaafsiisan goobta Grenfell Tower</u>**

13. Guddigu wuxuu ku tallinayaa in la dhiso kayd, ayadoo lala shaqeynaayo khabiiro ay kujiraan Kaydka Qaranka. Qaybo kamid ah kaydka ayaa laga yaabaa inay helaan oo kaliya xubnaha qoysaska dadka dhintay iyo dadka badbaaday.

14. Guddigu wuxuu sidoo kale soojeedinayaa in kaydka dhigitaalka iyo xasaasiga ah sidoo kale qaab ku habboon loogu saleeyo xubnaha qoysaska iyo kuwa badbaaday.

15. Guddigu wuxuu soojeedinayaa in la qabto bandhig dadwayne oo waqti dheer ah. Ayadoo lala kaashanaayo kaydadka, arrintaan waxay fududeynaysaa in jiilalka hadda iyo kuwa mustaqbalka wax ka bartaan oo ay xasuustaan masiibada, waxyaabaha keenay, sida bulshada Grenfell oga falceliyeen.

16. Guddigu wuxuu soojeedinayaa waxyaabaha kamid ah (ama ka socda) Grenfell Tower – ee aan

kasii mid noqon karin qayb kamid ah xasuusta aana lasii kaydin karin – in si ammaan ah oo xushmad leh "loogu aaso" meel labaad, oo habboon, la tagi karo ahna goob xurmo leh. Goobtaan waa inay aqbalaan xubnaha dadku ka dhinteen iyo dadka ka badbaaday masiibada ayagoo kala tashanaya hogaamiyaasha diinta. Waxaan dawlada ka codsanaynaa inay la shaqeeyaan Guddoomiyaha London iyo hogaamiyaasha diinta ee deegaanka si loo helo goob.

**<u>Ka qaybgelinta bulshada Grenfell</u>**

Waan ogeyn laga bilaabo maalintii koowaad in diiradeenu ahayd inaan dhageysano bulshada Grenfell si goobta xasuusta ee mustaqbalka loogu saleeyo rabitaanada dadka dadku ka dhinteen, dadka ka badbaaday masiibada iyo dadka deegaanka. Tani marna ma ahaateen shaqo fudud, waxaa sidoo kale sii adkeeyay masiibada Covid-19; laakiin waxaan kusii dadaalnay shaqada iyo inaan ka dhabeyno gaarista yoolka anagoon eegeyn cabaqadaha aan wajahnay.

Aniga, oo ah Guddiga, waxaa si toos ah noo saameeyay masiibada. Waxaan qirsanahay inay ahayd masiibo anaga nagu dhacday, oo sii wada inay nagu yeelato saameyn, ku aadan fikirkeena. Waxaan rabnaa inaan si furan u sheegno sida anaga, nafteena, aan sidoo kale ugu baahanahay isfahan iyo dulqaad.

Qaabka aan u wajahayno bulshada Grenfell waxaa aasaas u ah arrimahaan soo socda ee muhiimka ah:

**Naxariista iyo dareenka**
Waxaan fahansanahay xanuunka iyo walaaca bulshada Grenfell waxaana ogeyn in qayb badan oo naga mid ah wada sheekeysiga nagala yeesho xasuusta ay kala kulmi karaan xanuun saa'id ah. Inta aan wadnay ka qaybgelinta bulshada, arritaan waxay ahayd mid xasaasi ah, anagoo midka midkeena kale taageeraayo sidoo kale bulshada Grenfell ka qaybgelinayna ayagoo lana wadaagaya fikirkooda ku aadan shuruudahooda, iyo qaabka ugu fiicaan ee ayaga ku habboon. Tani waxaa kujira u oggolaanshaha dadku inay nala wadaagaan aragtidooda ayagoo adeegsanaya luuqad kasta ama mid dhexe, ayagoo shaqsi ahaan ama si wada jir ah qayb ka ah wakiilada ama kooxaha qoyska.

Waxaan aqoonsanay inuusan qof walba awoodin ama diyaar u ahayn inuu ka hadlo arrintaan iyo in bulshadu leedahay dhaqano kaladuwan, ayna qoysasku u xusaan una xasuustaan dadkooda siyaabo kaladuwan.

Waxay ahayd muhiim inaan dib usii wadno waxyaabaha aan maqalnay si dhammaan xubnaha bulshada Grenfell u helaan fursad ay ku fahmaan waxyaabaha dhacaya. Waxaan sheegnay, billoowgii, inaan arrintaan aan sameyn doono illaa inta loo baahan yahay, iyo inaan ku saleyn doono waxyaabaha ay rabaan bulshada Grenfell. Ma aanan dooneyn inaan dedejino hawsha, laakiin sidoo kale waxaan ka warqabnay inay muhiim ahayd in la sameeyo horumar ku aadan mustaqbalka xasuusta masiibada.

**Kala duwanaanshaha iyo Isku dhafka dadka**
Waxaan u dabaaldegnaa oo aan qiimeynaa kaladuwanaanshaha bulshada Grenfell, waxaana fahansanahay in loo baahan yahay qaabab badan oo ay dadku kusoo bandhigaan rayigooda.

Intii saddex sano ah, dadku waxay nala wadaageen rabitaanadooda iyo fikrado la xariira xasuusta, inta lagu jiray kulanada, wada sheekeysiga, qoraalo (oo ay kujiraan kuwo lagu qoray luuqado kaladuwan oo bulshadeena kamid ah) iyo xataa sidoo kale kuwo loo adeegsaday sawiro iyo farshaxan.

Ka qaygelinta arrintaan dadka ay ka dhinteen dad iyo dadka badbaaday waxaa markii koowaad sameeyay wakiilada dadka ay ka dhinteen dadka iyo dadka ka badbaaday masiibada ee ka tirsan Guddiga. Sidoo kale waxaan sameyney ogeysiisyo aan kula xariinayno dadka deegaanka in ka badan 200 oo maalmood, la hadlida xubnaha bulshada si aan u hubino inaan maqalno guud ahaan dadka kaladuwan ee deegaanka kunool.

Dadka shaqadaan ka qaybqaatay waxaa kamid ah dad ku hadla luuqadahooda hooyo oo kaladuwan, oo ay kujiraan Amxaarik, Carabi, Diakanke, Farsi, Faransiis, Hindi, Itaaliyaan, Malinke, Burtiqiis, Soomaali, Isbaanish, Ssosso, Sylheti, Tigrinya iyo Urdu.

Waxaan dhageysanay oo aan qiimeynaa ragti kasta, laakiin qayb wayn oo gaar ah ayaa dabcan ahayd aragtiyada qoysaska dadku ka dhinteen.

**Wada shaqeynta**
Shaqada aan wajanay waxay ahayd mid adag waxaana ogeyn inaan u baahanahay furnaan iyo maskax wada shaqeyn, iyo inaan isku geyno awoodeena tamar iyo tayada bulshada Grenfell. Waxaan helnay taageero, caawimaad iyo tallo aad u wayn oo ku aadan yoolkeena – oo aan ka helnay xubnaha bulshada Grenfell, qoysaska dadku ka geeriyoodeena iyo dadka ka badbaaday masiibooyinka kale ee aduunka oo dhan, khabiirada hawsha qaybta ka ahaa iyo qaabeynta, iyo khabiiro kale oo si toos ah ula shaqeeyay Guddiga Xasuusta.

## Sidee goobta xasuusta mustaqbalka ay tahay inay u ekaato

Bayaanka yoolka goobta xasuusta Grenfell Tower:

*Goobta xasuusta waxay noqon doontaa goob udub dhexaad i ah **ammaan**. Waxay yeelan doontaa meel dib **loogu milicsado** oo lagu xasuusto dadka nolashoodii ku waayay masiibada, iyo **sababta** masiibadaan u dhacday iyo baahida loo qabo **cadaalad**.*

*Goobta xasuusta waxay ka **turjumaysaa bulshada** Grenfell iyo **laceylka** ay isku qabaan, waxayna muujinaysaa dareen leh **rajo** iyo **wanaag** oo **lagu xasuusto wixii dhacay** oo **eegaya mustaqbalka.***

*Waa goob loogu talagalay dadka dhintay, dadka masiibada ka badbaaday iyo xubnaha bulshada deegaanka **si ay isku yimaadaan**.*

*Xasuus leh **xush**, **adag** oo **sii jirta** muddo badan oo xusta dadka nolashooda ku waayay masiibada, dadka dabka ka badbaaday iyo xubnaha bulshada deegaanka.*

Bayaanka yoolka ee kore waxay qeexaysaa waxa xasuustu qaban doonto, ee laga aruuriyay dhammaan dadka aan dhageysanay. Waa erayada bulshadeenu u isticmaaleen inay ku qeexaan qaabka goobta xasuustu u ekaan karto.

Yoolka xasuusta, iyo yoolkeena ka guddi ahaan, waxaan qaabeynay oo aan iskudubaridnay waxa aan maqalnay. Markii koowaad ee aan isku imaanay guddi ka ahaan afar sano kahor, waxaan billoownay warqad shaqo oo faaruq ah. Tallaabo kasta oo aan qaadnay waxay ka timaaday wada sheekeysiga aan la yeelanay
iyo waxyaabaha dadku noo sheegeen.

Bayaanka yoolka xasuusta Grenfell Tower waxaa la sameeyay kadib markii aan la hadalnay bulshada

Grenfell waxaana la cusbooneysiiyay intaan sii wadnay inaan la hadalno aadna dhageysano bulshada Grenfell. Qaybtaan aragtida ee bayaan aragtida, waxaan ku darnay in xasuusto noqoto mid 'adag" oo sidoo kale 'waarta'. Maadaama muddo laga joogo masiibada, bulshada Grenfell waxay dalbadeen – waxayna sii wadeen inay dalbadaan – taasina waa inaan marna la oggolaan in la ilaawo. Xasuusto waa inay waligeen meesha ka saarin taariikhda.

Markii uu soo ifbaxay go'aan lawada leeyahay, waxaan ku darnay bayaanka aragtida su'aalaha aan dadka waydiinay, anagoo si taxadar leh u hubinaynay in fikradaha billoowday soo ifbaxaan, sida ubaxa qaab qurux badan ugu soo baxo, waxay ahayd mid kamid ah qaababka aan dareenay inay sax ahaayeen kuna habboonaa dadka.

Waxaa sheekadeenu ku caddeynay waa in goobta xasuustu noqoto meel ammaan ah oo lagu xasuusto dadka aadka u quruxda badnaa ee naga dhintay.

Waa inaan la iska indho tirin caddaalada, sababta masiibadu u dhacday iyo sida la iskaga ilaalin lahaa. Waa inay noqoto astaan muuqaal u ah waxa dhacay waana inaan marna la ilaawin ama la dayicin. Waa inay ka turjumayso jaceylka iyo awooda bulshada Grenfell waana inay abuurto rajo iyo wanaag ku aadan mustaqbalka.

Goobta xasuusto waa ay waari doonaa, waxay jiilalka soo socda oga hadli doonaan qaabka ay oga hadlaan qoysaskeena, saaxiibada, iyo dadka aan jecel nahay, oo ka bilaabanaysa maalinta la dhiso. Waa inay noqoto meel ammaan ah oo xushmeyso xasuusta dadka aan waynay, guud ahaan, si kastaba oo ay isku badelaan aduunyada nagu xeeran. Marka aan ka hadalno xusku inuu waaraayo, waxaan ula jeednaa inay noqoto meel lagu xasuusto oo aan dhammanteen kusii noolaan karno.

Dhammaan fikradaha iyo aragtiyada ay nala wadaagaan bulshada Grenfell waa muhiim waana qaali haddii aynaan awoodin in lagu daro dhammaan. Waxan ka dhacay Grenfell waxahay ahayd masiibo qaran laakiin marka taas laga imaado, waxay ahayd masiibo si gaar ah u taabatay dadka aan jeclahayn. Waxaan si cad u dhageysanay in goob khaas ah oo dadkii dhintay lagu xasuusto in loo sameeyo dadkii dhintay ee aan jeclahayn.

Wada sheekeysiga aan la yeelanay Lancaster West Estate iyo bulshooyinka kale ee dhaw, sidoo kale waxaa jiray taageero adag oo ka dhashay codka dadka dadkoodii masiibada ku dhinteen. Inta badan bulshada deegaanka waxay sheegaan in goobta xasuusta mustaqbalka ay tahay inay ka turjunto rajada iyo aragtiyada dadka dadkoodii ka dhinteen, ayadoo sidoo kale aad u taageereen dadka ka badbaaday masiibada iyo bulshada deegaanka.

Inkastoo ay jireen dardaarano iyo rabitaano badan oo nalala wadaagay, waxaa jiray heshiis ah in ujeedada koowaad ee goobta xasuusto noqoto meel lagu xasuusto dadkii naga dhintay iyo meel loo aqoonsado meeshii ay ka dhacay masiibada iyo inaan kusii hayno maskaxdeena. Dadka aan waynay waa in la geliyo goobta dhismaha.

Warbixinteenii hore, *Xasuusashada Grenfell: safarkeena ilaa hadda*, waxaan ku wadaagnay aragtiyada iyo fikradaha aan maqalnay. Waxaan ku kalsoonay inaanan ka weecan oo aanan badelin arrintaas, sababtoo ah waxaan sii wadnaa inaan maqalno iska fikradaha aan ka wada hadalnay waxaana kuwo badan kasii maqalnaa dadka.

Nidaamka naqshada ee aan kaga hadalnay dukumiintigaan waxaa kujiri doonaa shaqo dheeraad ah oo ay qayb ka yihiin bulshada Grenfell si aan u qaabeyno naqshada kama danbeysta ah ee goobta xasuusta. Waxaan aan halkaan ku muujinay waxay ka kooban yihiin tallada bulshadeena ee ku

saabsan waxyaabaha muhiimka ee goobta xasuusta.

**<u>Maxaa dhacaya kadib marka la daabaco warbixintaan?</u>**

Kahor gu'a 2026, Guddigu wuxuu filayaa in la heli doono naqshada kama danbeysta ah ee goobta xuska Grenfell Tower.

Si loo gaaro meeshaan, waxaa la abuuri doonaa naqshad kooban oo ku saleysan warbixintaan. Waxaa la casuumi doonaa kooxda naqshadeynta si ay xog kooban oga bixiyaan habka lasoo jeediyay ee la xariira shaqadaan muhiimka ah. Liiska kooxaha lakala saaray ayaa markaas kadib la casuumo doonaa si loo sii hormariyo fikradahooda.

Qareenka kooxda waa inuu awoodo inuu soo bandhigo aragtida goobta xasuusta ee looga hadlay warbixintaan kadibna lasii wadi doono si loo sameeyo naqshada kama danbeysta ah. Bulshada Grenfell waxaa si dhaw loola socodsiin doonaa tallaabo kasta oo kamid ah hawsha, ayadoo wada shaqeyn ka dhexjirayso bulshada iyo kooxda naqshada gaar ahaan meelaha isbadelka badan laga sameyn karo. Arrintaan waxay xaqiijinaysaa in naqshada kama danbeysta ah ay ka turjunto rabitaanada bulshada loona badelo goob muuqatada oo waligood nala joogta.

**Diseembar 2023: soo gabagabeynta naqshada kooban iyo faahfaahinta habraaca doorashada.**
Waxaan adeegsan doonaa waxyaabaha aan ka maqalnay bulshada Grenfell, faahfaahino ku saabsan goobta iyo tallo sharci si aan u abuurno naqshad kooban. Tani waxay si cad u qeexaysaa jawiga iyo goobta ay u ekaan doonto goobta xasuusta, nooca loo dhisi doono iyo faahfaahinada ay codsadeen dadka dadkoodii dhinteen, dadka masiibada ka badbaaday iyo bulshada Grenfell. Sidoo kale waxay qeexi doontaa nooca kooxda loo baahan yahay inay naqshadeeyaan ayna abuuraan goobta xasuusta mustaqbalka. Kuwaan waxaa sida muuqata kujirio doonaa kooxda dejisa naqshada, naqshadeeyaaasha muuqaalka ama farshamaxiistayaal, waxayna ku dari doonaan waxyaabaha muhiimka ah ee ay tahay in kooxda naqshada eegaan.

**Gu'a 2024: raacinta kooxda naqshadeynta goobta ee mustaqbalka**
Furista nidaamka doorashada kooxda naqshadeynta goobta xasuusta. Waxaan soo daabici doonaa shuruudo cad iyo faahfaahino ku saabsan qaabka kooxaha doonaya u codsan karaan.

■ Dadka codsanaya waxaa la waydiin doonaa inay muujiyaan khibradahooda ku haboon hawsha, sida wax dhismo naqshadeynta iyo ku takhasuska naqshada muuqaalka, iyo khibrada ay u leeyihiin inay si wada jir ah ula shaqeeyaan bulshada.

■ Ma waydiin doono naqshadaha inta lagu jiro marxaladaan, laakiin waxaan rabi doonaa faahfaahinta kooxda lasoo jeediyay, qaabka ay doonayaan inay u wajahaan naqshada, iyo sida ay ula shaqeyn doonaan bulshada.

■ Waxaan raadin doonaa kooxo leh wada shaqeyn oo qayb ka noqda habraaca bulshadu hogaamiso. Kooxaha leh diirad saarida bulsho ee adag ayaa lagu dhiirigelinayaa inay codsadaan.

**Xagaaga 2024: kala saarista**

■ Guddiga goobta Xasuusta ayaa eegi doonaa oo kala saari doonaa tirada kooxda soo codsaday naqshadeynta waxayna ugu badnaan ka soo reebi doonaan shan, ayagoo wakiil ka ah bulshada Grenfell iyo sidoo kale taageero ka helaya la-taliyaal.

**Dhammaadka 2024 iyo horaanta 2025: doorashada kooxda naqshadeynta goobta**

■ Waxaan ka codsan doonaa kooxaha liiska gaaban lagu soo daray inay diyaariyaan habraaca naqshada ay sameyn lahaayeen haddii la doorto. Taasi waa inay ku daraan bandhig soojeedin oo muuqaal ah oo muujinaya qaababka goobta xasuusta u muuqan doonto.

■ Waxaa  lala wadaagi doonaa bulshada, si toos ah iyo si oonleen ahba, si loo hubiyo in dadka dadkoodii dhinteen, dadka masiibada ka badbaaday iyo dadka kale ee kamidka ah bulshada Grenfell inay udub dhexaad usii noqdaan hawsha goobta xasuusta. Waxaan bixin doonaa faahfaahinada waqti ku habboon qaababka kaladuwan ee bulshada qayb oga noqon karto hawshaan si ay hormuud oga noqdaan.

■ Guddigu wuxuu dejin doonaa shuruudo cad oo lagu qiimeynaayo kooxaha liiska kujira oo lagu eegaayo soojeedintooda, kuna jiraan naqshada kooxdooda, soojeedinada naqshada, iyo habraaca la shaqeynta bulshada. Kooxaha waxaa laga filayaa inay ka jawaabahaan baahiyaha bulshada iyo farsamada iyo tallada khabiirka.

■ Waxaa markaas kadib la dooran doonaa kooxda kama dambeysta ah waxaana lala socodsiin doonaa bulshada Grenfell. Waxaa la abuuri doonaa naqshada goobta xasuusta oo faahfaahsan, ayadoo si dhaw loola shaqeynaayo bulshada Grenfell.

**Kahor Dhammaadka 2025: sameynta naqshada goobta xasuusta**

■ Waxaa la abuuri doonaa naqshada goobta xasuusta oo faahfaahsan, ayadoo si dhaw loola shaqeynaayo bulshada Grenfell.

■ Waxaan filaynaa codsiga qorsheynta ee naqshada goobta xasuusta ee kama danbeysta ah in lasoo gudbiyo.

**Gu'a 2026**

■ Waxaan filaynaa in la ansixiyo qorsheynta loogu talagalay goobta xasuusta.

**Dhammaadka 2026**

■ Qaybta koowaad ee dhismaha xasuusashada ayaa bilaaban karta. Tani waxaa lagu saleyn doonaa marka koowaad ee Guddiga Xuska diyaar noqon doono, ayadoo la haysto naqshad lagu heshiiyay, si loo bilaabo diyaarinta dhismaha.

**Sida loola xariiro Guddiga Xuska ee Grenfell Tower:**

■ Iimaylkaan nagala soo xariir GTMCSecretariat@levellingup.gov.uk

■ Naga soo wac lambarkaan 0303 444 4831

■ Booqo boggeena nagala soo xariiro si aad noogu soo dirto fikrado, aadna si toos ah ula hadasho wakiilada ama iska qor qoraaladeena wararka: www.grenfelltowermemorial.co.uk/contact

■ Si joogto ah nagala soco warbaahinta bulshada (@GrenfellTowerMC)